



Daabacaadda iy Taariikhda Xaq Daabacaadda: Minnesota Humanities Center, 2008

Hordhac: Sheekadani waa sheeko xariiro Soomaaliyeed oo dib loo soo tebiyey. Nin reer miyi ah ayaa la kulmaya dhibaatooyin farabadan, kuwo jira iyo kuwo aan jirinba, isagoo dhul cusub usoo sahaminaya reerkiisa. Isagoo aan filanayn ayuu ogaanayaa in ducadiisii la aqbalay. Sheekadan waa mid ka mid ah afar sheeko xariirooyin Soomaaliyeed oo labo luqadood ku qoran, sawiranna, uuna daabacay Barnaamijka Buugaagta ku Qoran Laba Luqadood ee Hay'adda Minnesota Humanities Center. Hadii aad doonaysid akhbaar dheeraad ah, booqo websaydka: www.mnhum.org/somalibooks.

Da'da loogu talagalay: 4-6, 7-10

Habka loo

akhrinayo sheekada: Khariidada tus carruurta si'ay u tilmaamaan meesha ay Soomaaliya ku taal.

Sheekada oo dhan hal luqad ku akhri si fahmideedu u sahlanaado.

Hadii qofka akhrinaya uusan ku hadlin labo luqadood, isticmaal cajaladda duubista ay ku duuban yihiin sheekada oo labada luqadoodba ah ee ay soo saartay Hay'adda Minnesota Humanities Center (www.mnhum.org/somalibooks).

Akhri sheekadaan markaad akhrinaysid sheekooyinka kale oo ku saabsan "qof dabaal loo malaynayo laakiin xigmad badan" ama "wise fools" sida Jack Tales, Juan Bobo iwm. Is barbar dhig sheekooyinkaan.

Su'aalaha inta aadan akhrin:

Qofka sheekadu ku socoto, Cigaal Shiidaad, waa nin reer miyi ah. Maxaad ka taqaan nolosha reer miyiga.

Hadii aad habeen ku safraysid Soomaaliya, maxaa laga yaabaa inaad aragtid ama maqashid?

Sheekadaan waxay ku saabsan tahay "qof dabaal loo malaynayo laakiin xigmad badan" ama "wise-fool." Maxaad u malaynaysaa macnaha oraahdan?

Waxaad sheekadaku

bilowdaa:

Sheekadani waxay ku saabsan tahay nin reer miyi ah oo safraya waqti habeen ah. Wuxuu u malaynayaa inuu arkay wax ku kalifay in istaago oo hubsado waxaas. Aan akhrino sheekada si aan u aragno wuxuu arkay iyo wixii uu safarkiisa ka bartay...

Su'aalaha marka

sheekada la akhriyo: Waa maxay sababta uu Cigaal Shiidaad u istaagay markuu arkay libaaxa?

Maxaa sameyn lahayd hadii aad libaax aragtid adigoo lugaynaya wado?

Marna ma sameysay waxa uu Cigaal Shiidaad sameeyey oo kale? Maxaa dareentay?

Waxyabo Kaleoo Sheekada La Xiriira

Farshaxanka: Ardayda tus qeyb ka mid ah sawir. Waydii waxa uu sawirku yahay inta aadan tusin sawirka oo dhan. Falanqeeya siday u arkaan?

Dhaqanka: Si aad wax uga baratid nolosha reer miyiga, booqo websaydka “Xpeditions” ee National Geographic: nationalgeographic.com/xpeditions/lessons/12/g35/boundariesmove.html

Jilidda: Markaad akhrisid waydii ardayda inay wajiyadooda u ekeysiiyaan waxa ay is leeyihiin in Cigaal Shiidaad dareemayo bog walba oo sheekada ah markaad kor u akhrinaysaan.

Luqadda: Gabayga sheekada ka soo dhexsaar. Akhri, kuna falanqee af-ingiriisi, dabadeedna dhegayso sida af-Soomaaliga loogu akhrinayo cajaladda duubista.

Sheekadan waxay dhacday hal habeen. Waydii ardayda inay sheegaan ereyada tilmaamaya isbedelka waqtiga. Sabuuradda ku qor, dabadeedna falanqee siday u tilmaamayaan isbedelka waqtiga.

Qoraalka: Ardayda waydii macnaha oraahda “qof dabaal loo malaynayo laakiin xigmad badan” ama “wise fool.” Ardaydu ha qoreen waqti ay ahaayeen “qof dabaal loo malaynayo laakiin xigmad badan” ama “wise fool.”

Ku baro sida loo qoro sheekooyinka “qof dabaal loo malaynayo laakiin xigmad badan” ama “wise fool” buugga loo yaqaan “Beauty and the Beast Storytellers,” adoo booqanaya:

beautyandthebeaststorytellers.com/pdf/noodleheadUnit.pdf

Waxyabo kale: Si aad u heshid talooyin ku saabsan sheeko xariirooyinka booqo websaydka:

http://edsitement.neh.gov/view_lesson_plan.asp?id=240

Talooyin la siinayo kuwa barta af-Ingiriiska: Ku caawi ardaydu inay sameeyaan layn waqti “timeline” muuminaya safaradii Cigaal Shiidaad. Soo bandhig sida waqtigu isaga bedelayo habeen iyo maalin. Laynkaas waqtiga ku muuji sawirro muujinaya waxa Cigaal Shiidaad sameynayo inta sheekadu socoto.

Buugaag la xiriirta sheekada

The Lion’s Share/Qayb Libaax* waxaa qoray Said Salah Ahmed, waxaa sawirada u sameeyey Kelly Dupre (2007)

Dhegdheer, A Scary Somali Folktale* waxaa dib usoo tebiyey Marian A. Hassan, waxaa sawirada u sameeyey Betsy Bowen (2007)

Wiil Waal* waxaa qoray Kathleen Moriarty, waxaa sawirada u sameeyey Amin Amir (2007)

Noodlehead Stories, World Tales Kids Can Read & Tell waxaa qoray Martha Hamilton (2000)

*Waxaa daabacday Minnesota Humanities Center.